

Dulmar guudka ee ku saabsan sida PSW-yada loogu qoondeeyo tallaabada



eXPRS waxay bilaabaysa kordinta mushaharka ee tallaabada-ku-salaysan ee cusub Luulyo 1, 2024 Tallaabada cusub waxay noqon doontaa sicirka mushaharka gundhigga ah ee adeegyadan:

- Tababarka Shaqada
- Adeegyada Daryeelka Xaadiraha
- Adeegyada Daryeelka Gargaarka
- Waqtiga Safarka

Mushaharka gundhigga ahi waa sicirka aad qaadata ka hor intuu is badal dicin. Waa kan sida eXPRS ay u siiso PSW kasta tallaabo!

Tallaaba da	Tirada Saacadaha La Shaqeeyay	Sicirka Luulyo 1, 2024
1	0 - 1999.999	\$19.50
2	2000.000 - 3999.999	\$20.50
3	4000.000 - 5999.999	\$21.50
4	6000.000 - 7999.999	\$22.50
5	Ka badan 8000.000	\$23.50

Xusuusin ahaan, PSW-yad waxay bilaabi doonaan inay ku arkaan talaabooyinkooda eXPRS Luulyo 15, 2024.

Dib-u-eegida—Tirinta saacadaha si aada u hesho

- eXPRS waxay xisaabin doontaa wadarta saacadaha la shaqeeyay iyadoo lagu saleynayo sheegashooyinka lacagta la bixiyay laga bilaabo Jan. 1, 2023 ilaa Juun 30, 2024, marka laga reebo saacadaha dheeraadka ah Tani waxay ka dhigan tahay in aan xisaabinayno kalya ilaa 40 saacadood toddobaadka shaqada. Intaa waxaa dheer, saacadaha kaliya ee sheegashooyinka lacagta la bixiyay ee ku jiro eXPRS wakhtiga dib-u-eegistu ay dhacday ayaa la tirinaya.

Sida PSW-yada loogu qoondeeyay tallaabo

- PSW-yada joogtada ah waxa la dul dhigi doonaa tallaabo ku salaysan saacadaha la shaqeeyay.
- PSW-yada Legacy waxaa lagu wareejiyaa tallaabo mushaarkeeda u dhiganta ama ka badan sicirka gundhigga ee hadda jira.
 - Haddii sicirka gundhigga u ah ee hadda jira uu dhaafo sicirka ugu sarreeya, wuxuu qaadan doonaa sicirka gundhigga ah ee hadda jira. Tan waxaa loo yaqaan "Sicirka Goobada Cas" ama RCR.
 - Haddii sicirka gundhigga u ah ee hadda jira uu u dhigmo tallaabada ku taala heerarka mushaarkeeda eXPRS waxay gelin doontaa tallaabadaas. Haddii sicirka gundhigga u ah ee hadda jira uu u dhexeeyo tallaabooyinka, waxaa loo wareejin doonaa tallaabada xigta.
 - Haddii wadarta saacadaha ay shaqeeyeen ay tahay 2000 ama ka badan, waxaa kor loogu qaadi doonaa hal talaabo oo kale.
 - Marka saacadaha PSW Legacy aysan u digmin talaabodooda cabbirka, waxaa la gelin doonaa saacadaha ugu yar ee tallaabadaas.

PSW-yada la aqoonsaday wixii ka dambeeya Luulyo 1, 2024, dib loo hawlgeliyay ka dib markay shaqayn waayeen 24 bilood, ama kuwa dib loo hawlgeliyay ka dib marka laga joojiyay:

- eXPRS waxay isticmaali doontaa taariikhda la aqoonsaday sida taariikhda bilawga ah ee tirinta saacadaha la shaqeeyay, marka laga reebo saacadaha dheeraadka ah.
- Iyada oo ay ku saleysan tahay natiijo, PSW-ga waxaa la siin doonaa tallaabo.

La xiriir Info.eXPRS@odhsoba.oregon.gov haddii aad su'aalo qabto!

Dulmarka guud ee Sida Sicirada PSW loo xisaabiyo

Adeegga Oggolaanshaha Hore (SPAs)

Tallaabada #1aad- Is barbar dhig Tallaabooyinka Mushahaarka ee ODDS iyo APD

- Haddii PSW-gu u leeyahay tillaabada lacag-bixinta ee leh ODDS iyo tillaabada lacag-bixinta ee ka duwan ee leh APD, eXPRS waxay u isticmaali doontaa tillaabada sare sicirka aasaasiga ah ee adeega.

Talaabada #2aad — Hubi Takhasusyada PSW-ga

- eXPRS waxay eegi doontaa haddii PSW-ga uu haysto mid ka mid ah takhasusyada ku taxan tiirka dhanka midig. Haddii ay haystaan, eXPRS waxay aadi doontaa tillaabada #3aad Haddii aysan haysan, eXPRS waxay isticmaali doontaa sicirka tillabada PSW-ga ee sicirka SPA.

Talaabada #3aad — Hubi qofka loo adeegay

- eXPRS waxay eegi doontaa haddii qofka loo adeegay uu u qalmo in La wanaajiyey, Gaar yeelay, ama CIIS. Haddii ay sameeyaan, iyo haddii PSW-ga u leeyahay takhasuska u eg, mushahaarka kala duwanaanta ayaa lagu dari doonaa sicirka.

Talaabada #4aad — Codso nooc kasta oo kala duwanaansho ah

- eXPRS waxay ku dari doontaa kala duwanaansho kale ee takhasusyada kale ee PSW-gu u leeyahay Xasuusnoow, kala duwanaanshaha qaar laguma dari karo kuwa kale. eXPRS ayaa si toos ah u go'aamin doonta sicirka SPA.

Khayraadka/Ilaha

- [Koorsooyinka Shahaadada OHCC](#)



eXPRS waxay si toos ah u go'aamin doontaa sicirka PSW ee SPA-yada iyadoo lagu saleynayo sicirka tillaabada PSW iyo sicirada kale ee kala duwan haddii u qalmitaanka la buuxiyo.

Takhasuska PSW-ga	Kala Duwanaanshaha Musha-
84-801 - CIIS-ka Kaaliyaha Daryeelka Shakhsi ahaaneed ee Guriga	\$2.00
84-806 - DD PSW Xirfadaha La Kobciyay	\$1.00
84-807 - DD PSW Xirfadaha Gaarka ah	\$3.00
84-808 - DD PSW CPR/ Fargaarka Koowaad	\$0.25
84-809 - DD PSW Tababaraha Shaqada Shaqaalaysiinta	\$2.50
84-818 - Kala duwanaanshaha PSW (PDC)	\$0.75

Marka SPA cusub la sameeyo, ni-daamka eXPRS wuxuu raaci doonaa habka bidixda si loo

La xiriir Info.eXPRS@odhsosha.oregon.gov haddii aad su'aalo qabto!